


***QEYBTA 60***

Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka (DCSD),

Waxaan rajeynayaa in qof walba uu yeeshay dhammaad isbuuc badqab oo raaxo leh. Inaga oo sii wadno la qabsigaan caadiga cusub, waxaan rabaa inaan u damaanad siiyo qof walba in degmada ay ka go'antahay inay si badqab ah wax u barto aqoonyahanadeena inaga oo sii wadno inaan qaadno tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu yareynayo ku faafida COVID-19 degmada. Waxaan naga go'an inaan taageerno baahiyada dhammaan aqoonyahanadeena iyo joogteynta badqabka tacliintooda, jirka, maskaxda, iyo dareenka sida mudnaanteena koowaad.

Si loo hubiyo badqabka iyo fayo qabka ardaydeena iyo shaqaalaha, waan sii wadeynaa inaan si iswaafaqsan u nadiifino oo u jeermisdilno xarumaheena iyada oo si adag loogu hogaansamayo hagida ay sameeyeen Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC). Iyada oo si ku haboon loo xiranayo maaskarooyin oo loo raacayo yareynta xeeladaha, ardaydeena waxay heli karaan tilmaanta ay u baahanyihiin inay wax ku bartaan, kobcaan, oo ku gaaraan filashadooda buuxdo.

Isbuuca la soo dhaafay, DCSD waxay kaashatay Nidaamka Bulshadeena HealthCare (OCHS) si ay u siiso shaqaalaha baaritaanka PCR COVID-19. Baaritaanada PCR waa in lagu sameeyaa sheybaarada oo caadi ahaan waxay qaadataa 24-48 saacadood natiijooyinka. Sabab la xiriirto korodh aan horay loo arag ee dalabka baaritaanka ah, oo ay la jiraan culeyska xiriirka fasaxa guud, wargelinada sheybaarka COVID-19 ayaa ku soo laabanayo si aad uga dambeyso sida la filanayay. OCHS waxay leedahay dhaqtarka caafimaadka qaliinka iyo kaalisooyinka goobta ee xarunteena si ay u siiyaan la talin caafimaad, baaritaanka PCR, iyo baaritaanka degdega shaqaale walba ee soo sheega inaysan fiicneyn.

OCHS waxay la shaqeysaa sheybaarada si loo aqoonsado shaqaalaha leh natiijooyinka laga helay marka koowaad oo iyaga u sameeyo wacitaanada taleefonka shaqsiga si u bixiyo natiijooyinka. OCHS waxay siisaa shaqaalaha, qaatay baaritaanka PCR, fursada lagu qaadanayo baaritaanka degdega oo mid ka mid ah goobtooda kale haddii loo baahdo. OCHS waxay ku bixineysaa baaritaanka degdega xafiiska degmada isbuucaan.

DCSD ay sidoo kale marti gelineyso rugta caafimaadka baaritaanka iyo tallaalka COVID-19 ee loogu tallogalay shaqaalaha, ardayda iyo bulshada. Tallaalo iyo baaritaan bilaash ah ayaa loo helayaa dhammaan da' walba. Dhacdada xigta ee balansan waa Jimcaha, Jan. 14, laga bilaabo 8:30 a.m. illaa 1 p.m. ee Dhismaha Maamulka iyo Waxbarashada, 1701 Mountain Industrial Blvd, Stone Mountain, GA. Si aad usu diiwaangelisid, fadlan riix halkaan.

Fadlan sii wad inaad booqatid websaydka Caafimaadka iyo badqabka COVID wixii warbixinta ugu dambeyso ee ku saabsan baaritaanka COVID-19 iyo tallaalada la siiyay bulshada DCSD oo ku xirnaatid Facebook, Twitter, iyo Instagram degmada. Sidoo kale waad booqan kartaa websaydka CDC wixii warbixinta karantiilka K-12 iyo la qabsiga nolol maalmeedka K-12.

**Aqoonsiga guusha Ardayga**




Isbuucaan, waxaan idinla wadaagayaa ardayda fasalka sideedaad Andrew Hall ee Dugsiga Dhexe Cedar Grove. Andrew waa qof qoraa barnaamijyada kumbuyuutarka ee dugsigiisa. Wuxuu marwalba rabaa inuu caawiyo macalimiinta, xubnaha shaqaalaha, iyo aqoonyahanadiisa xiggo oo ay la jiraan baahiyadooda farsamada. Andrew waa arday heer sare iyo qof daryeelid leh. Waan ku faanaa inaan idinla wadaago ardaygaan cajiibka ah!

**Diiwaangelinta Furan ee Dooqa Dugsiga**

Diiwaangelinta furan ee Dooqa Dugsiga hadeer wuu furanyahay oo wuxuu xirmayaa Feb. 4, 2022, oo arjiyada onleenka ah. Arjiyada daahay waxaa la ogolaanayaa illaa Agoosto 31, 2022; si kastaba, xulashada waxay ku saleysnaaneysaa helitaanka korsiga. Si aad u codsatid, fadlan booqo websaydka Dooqa Dugsiga.

**Xaalada Degmada**

Waxaan bixinayaa gobolkeyga labaad ee ciwaanka degmada Jan. 26 saacada 6:30 p.m. Dhacdada waxaa laga siideynayaa DSTV. Waan ku faraxsannahay inaan wadaago sida aan horay iyo kor ugu socono oo aan u siino waxbarasho tayo leh dhammaan aqoonyahanadeena.

**<u>Sahanka Aalada Ardayga</u>**

Sanduuqa Isku xirka Xaalada degdegga ee Guddiga Isgaarsiinta Federaalka wuxuu u qoondeeyay maalgelinta lagu caawinayo dugsiyada inay daboolaan qarashaadka aaladaha iyo xiriirka intarneetka oo loogu tallogalay ardayda aan laheyn helitaan ku fillan oo waxbarashada onleenka ah. Fadlan dhameystir sahanka si aad uga caawisid in DCSD go'aansato baahiyada 2021-22 iyo 2022-23 sannadaha dugsiga. Degmada waxay isticmaaleysaa warbixintaan inay iibsadaan aaladaha iyo intarneetka oo sii wadayo taageerida ardaydeena. Haddii aad leedahay wax ka badan hal canug ee ka qeybgalo dugsiga ee ku yaalo Degmada Dugsiga Gobolka DeKalb, fadlan u buuxi sahan gooni ah canug walba. Si loo dhameystiro sahanka, fadlan riix halkaan.

**<u>Qorshaha Mastarka Dhameystiran</u>**

Waxaan rabaa inaan u mahad celiyo xubnaha Gollaha La taliyaha Maamulaha (PAC) ee ka qeybqaatay Qorshaha Mastarka Dhameystiran ee fogaanta ah (CMP) kulanka S&J ee isbuuca la soo dhaafay. Waxaan ku rajo weynahay in nidaamka CMP ay naga caawineyso sii wadista dhisida aaminaad iyo daah furnaanta ee kooxda daneeyayaasha balaaran. Fadlan riixhalkaan si aad u eegtid jawaabaha ku aadan su'aalaha la weydiiyay inta lagu jiray kulanka. Sidoo kale, fadlan riix halkaan si aad u dhameystirtid sahanka jawaab celinta daneeyayaasha CMP. Waan sii wadeynaa inaan u dhaqaaqno hore iyo kor sida degmada!

Fadlan sii wad inaad ka booqatid websaydkeena iyo websaydka dugsigaaga oo warbixin ugu dambeyso ee wararka degmada. Fadlan riix halkaan si aad u daawatid kulanka Guddiga Waxbarashada maanta. Isbuuc wanaagsan!

Daacadnimo,

Marwo Cheryl Watson-Harris